


Farshaxanad Faadumo W/D: Cabdiraxiin Hilowle Galayr



Farshaxanad Faadumo Farshaxanku waa hal abuur aan cid weliba heli karin haloosin karin oo haaneedin karin, mar waa aqoon la barto oo habka shaxda iyo jiidamaheeda lagu sargooyo halbeeyo isu dheelitiran, marna hibbo ah oo eebbe dadka uu doono muquunno uga dhigo. Faadumo aweys ahaa ah, gabadh yar oo da'deedu tahay 19 jir, waxay ku dhalatey dalka sucuudiga, waxbarashadeeda qaybo ka mid ahna ku soo qaadatay, haatana waxay ku sugan tahay soomaaliya iyo dhulkeenna hooyo



Muuq muujinaya laba tawl(Waalid) Soomaaliyeed ama Hooyo iyo Aabbe Faadumo waa farshaxanad aad u taqaan tabta iyo qaabka wax loo xardho, si qurux badana u haaneedisa, hubaal marka aad dheehato muuqaal gacmeedyada ay qalinkeeda ku xaradhey waxaad arkeysaa da'deeda iyo curiskeedu inuu kala weyn yahay




Muuqaalka Abwaan, Qoraa, Xeeldheere dhaqan iyo suugaaneed(Xuseen Sheekh Axmed Kadare (AUN) Hal abuurka ayaa iyadoo ay dad badani wadaagaan, haddana lagu kala horreeya, waxaa ka muuqda sida aad ku aragtaan indhihiina, inay farshaxanimo Faadumo tahay mid heerkeedu sarreeyo oo aqoon iyo xeeldheeri weheliso. Aragti kale ee la yaabka ah ayaa ah iney Faadumo tahay gabar dhigata ilaa hadda dugsiga sare oo aan dhammeynin waxbarashadii aas aaska ahayd, haddana Farshaxanka oo bulshadeena ku yar ay tahay labka dhankiisa, inay iyadu noqotey gabar farshaxanad ah



Muuqa gabadh soomaali ah oo xidhan hu'gii hiddaha iyo dhaqanka



Muuqaalka gabadh soomaali ah oo hu' magaalo xidhar



Muuqaal sawir hummaageed ka mid ah sawiradda Kartooniska Faadumo waxay hadda u shaqaysa Madasha hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed (Akadamiyada fanka iyo suugaanta) waxaan ku boggaadinayaa xulashada doorkeeda wanaagsan ee farshaxanimada, waxaan sidoo kale kula dardaarmayaa kuna dhiirigelinayaa, dhallinta ineysan ka maagin, kana gaabsan hiwaayada iyo farsamooyinka u kaydsan ee eebbe hibbooyinka u siiyey. W/D: Cabdiraxiin Hilowle Galayr